



XAQIIQOYIN DEGDEG AH OO KU SAABSAN Essential Plan

sideen isu diiwaangelinayaa?

 nystateofhealth.ny.gov

AMA

 1-855-355-5777 or
TTY: 1-800-662-1220

AMA

 Iyadoo loo marayo caawimaad fool ka fool ah oo aad ka heleyso caawiye shahaado haysta meel u dhow gurigaaga ama shaqadaada.

Sideed iiga caawin kartaa luqaddayda?

Caawimada waxaa lagu heli karaa luqaddaada telefoon ahaan iyo qof ahaan.

Goormaan is diiwaangelin karaa?

Isku diiwaangelinta Essential Plan waxa uu furanyahay sannadkoo dhan.

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/ diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/ qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Waa maxay Essential Plan?

Caymis caafimaad oo cusub oo ay helayaan dadka Reer New York oo aysan wax lacag joogta ah ku bixinayn dadka u qalma. Oo waxay bixisaa dheefo lama huraaan ah oo isku mid ah.

Yaa u qalma?

Dadka dakhligooda uu hooseeyo oo aanan u qalmin Medicaid ama Child Health Plus.

Cabbirka qoyska	Inta uga badan ee aad samayn karto
1	\$39,125
2	\$52,875
3	\$66,625
4	\$80,375

Waa imisa qiimaheedu?

Lacagta bishii la qaado ayaa ah \$0 dadka u qalma caymiska.

Sidee kale ayay lacagta iiga dhintaa?

Malaha KA JAR JARISTA, sidaasna qorshahu waxa uu ku bilaabmaa bixinita tooska ah ee daryeelkaaga caafimaad.

Gunnooyinka caafimaadka ilkaha iyo indhaha ayaa ku jira ayadoon wax qarash ah lagaa rabin.

Waxaad heshaa DARYEEL KA HORTAG AH OO LACAG LA'AAN AH sida baadhitaanada caadiga ah ee dhakhtarkaiyo baadhitaanada si aad caafimaad qab u sii ahaato.

Maxaa uu daboolaa Essential Plan?

Adeegyo isku mid ah oo ay daboolaan qorshayaasha kale:

- boqashooyinka dhakhtarka, ay ka mid tahay dakhaatiirta takhasusku
- baadhitaanada dakhtarkaaga
- daawooyinka la qoro
- bukaan jiifka iyo daryeelka bukaan socodka ee cusbitaalka
- iyo wax badan.